Axad idinka midihi ma rumayn ilaa uu iga jeclaado waaridki, caruurtiisa iyo dadka oo dhan

Anas Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: " Axad idinka midihi ma rumayn ilaa uu iga jeclaado waaridki, caruurtiisa iyo dadka oo dhan".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu inoo sheegay in Qofka Muslimku iimaankiisu kaamil noqon karin ilaa uu ka hor mariyo jacaylka Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee jacaylka hooyadii, Aabbihi, Wiilkiisa, Gabadhiisa, iyo dadkoo dhan, jacaylkaasina wuxuu keenayaa in la adeeco, loo gargaaro iyo inaan la caasiyin.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/5953